

# MA TAHAY IN LAGAA BAARO Cagaarshoowga B?



Cagaarshoowga B waa fayras ku dhaca beerka wuxuuna keeni karaa kansarka beerka.



Dad badan ma oga inay qabaan caabuqa waayo ma dareemaan xanuun, laakiin waxay fayraska u gudbin karaa dadka kale.



Waxaa jira talaal badqab iyo waxtar leh oo looga hortago cagaarshoowga B. Waa inaad dhamaysataa taxaneyaasha talaalka si aad u hesho difaac buuxa.



## Cagaarshoowga B waxaa laga qaadaa:



Hooyada uurka leh ee ku rida ilmaheeda markuu dhalanaayo



Samaynta galmada



Taabashada dhiiga qof caabuqa qaba



Wadaagista sakiin, buraashka cadayga, ama cidiyiyo jarta

## QOFKEE AYAY TAHAY IN LA TALAALO?



Dhammaan ilmaha dhashay



Dhammaan carruurta aan qaadan talaalka iyo dadka waawayn ee jira illaa da'da 59 sano, ayadoon laga eegayn khatarta ay u geli karaan



Dadka waayeelka ah ee jira 60 sano iyo ka wayn ee khatarta wayn ku jira sida:

- Inay galmada ka qaadaan
- Taabashada dhiiga qof qaba caabuqa
- U safrida goobaha caabuqa Cagaarshoowga B uu yahay heerarka dhexe illaa sare
- Cudurka beerka ee muddada-dheer jiray ama caabuqa HIV

**Si aad u hesho xog dheeraad ah:**

[www.cdc.gov/hepatitis/hbv/](http://www.cdc.gov/hepatitis/hbv/)  
[doh.wa.gov/hepbhub](http://doh.wa.gov/hepbhub)

**HepB Hub**

[doh.wa.gov/hepbhub](http://doh.wa.gov/hepbhub)



Washington State Department of

**Health**

DOH 420-407 May 2022 Somali

Si aad u codsato dukumiintigaan oo qaab kale ah, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir [civil.rights@doh.wa.gov](mailto:civil.rights@doh.wa.gov).

Waxaa lagasoo xigtay Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)